MA DOONEYSAA IN AAD BARATO SIDA MUUSIKADA LOO GARAACO AMA LOO HEESO?

Waxaa ku soo dhowaataa in aad iska soo diwaangeliso iskoolka muusikada ee Gislaved. Waxaa xarunteena ka baran kartaa sida garaaco qalabka muusikada ama sida loo heeso. Waxaa diyaar noo ah dad badan oo koox ahaan muusikada u wada garaaci, koox muusikiiste ah, kooxo turunbo u wada heeso.

**Qalabka Turunbo**

Sanadka ugu horeeya waa kireysan kartaa. Ma khusayso turunbooyinka yaryar.

Sanadka labaad oo barshada turunbada waxaa ku biiri kartaa kooxda turunbada garaacda.

Waxaa dooran kartaa:

– Turunbada yaryar
– Turunbada biibiilaha
– Turunbada foorida
– Turunbada la buufiyo
– Turunbada tuubada leh oo laga afuufo
– Turunbada weyn
– Turunbada nooc weyn oo dhexda ka duuban
– Turunbada dhinaca laga jiido markii la garaaci
– waa nooc kale oo turunbada ah
– gitaar oo ul lugu garaaco marka laga ciyaarsin
– Tuba : waa nooc kale oo turunbada ka mid ah

Kitaar waxaa ku bilaabi kartaa in aad barato nooca xargaha. Markaas ka dib adigaa kala dooran doona kitaar xargaha, midka noocyada korontada ku shaqeeya. Adigaa naftaada usoo gadan doona qalabkaaga, Laakin talo weydii macalinkaaga iskoolka muusikada ka hor inta aadan soo gadan qalab. Dhowr sano ka dib waa ka mid noqon kartaa koox garaaca kitaarada ama kooxo ku heesa kitaarka.

## Kitaarka usha lugu garaaco

Kitaarka usha lugu garaaco wuxuu leeyahay cabiro kala duwan Kitaarka waa kiraysan kartaa qalabkaas intii aad u baahan tahay hadii ay yihiin nooca yaryar.

Dhamaan ardeyda kitaarka usha lugu garaco waxay garaaci doonaan kitaarka usha laga bilaabo sanadka kowaad.

Waxaa dooran:

| | |
|---|---|
| – Nooca yar oo kitaarka usha | Fiol (violin) |
| – Nooca dhexe | Altfiol (viola) |
| – Nooca waaweyn | Cello |
| – Nooca dhulka la dhigto | Kontrabas |

Biyaano waxaa u baahan tahay in aad haysato biyaano. Hal sano ka dib waxaa kuu suurtoobi karta in aad ka mid noqoto koox hal mar isla sameeya.

SUZUKI barashada Suzuki waxaa laga dooran karaa laga bilaabo 5 sano. Ka qaybgalka waalidiinta ee casharadu waa la socdaan ama waa ku jiraan. Waxaad kala dooran kartaa

- Fiol
- Cello
- Piano

## Durbaanka

Waxaan ku casumaynaa barashada durbaanka waqtiga iskoolka ee Gislaved , Anderstorp, Smålandsstenar iyo weliba Reftele.

Ardeyda ka imaan degmooyinka kale waxaa lugu casumi macquul ahaan in ay ku bartaan muusikada iskoolka muusikada ee Gislaved waqtiga iskoolka ka dib.

Waxaad ku bilaabi durbaani badan oo isku xiran. Waxbarashada waxaa xitaa lugu soo koobi noocyo kala duwan oo durbaanka la garaaco ah.

Waxaa khasab ah in aad haysato hal durbaan si ay kuugu suurtogasho in aad ku tababarato gurigaaga. Ha soo iibsan wax qalabka ka hor inta aadan talo weydiin macalinka musikada iskoolka.

Waxaa kala qaybqaadan koox kooban oo durbaanka garaacda Gislaved oo ka socda ardada sanadka labaad. Dhow sano ka dib waxaa kuu suurta geli karta in aad ka mid noqoto kooxda durbaanka ee Gislaved.

## Kooxda koob ka ciyaarka

Iskoolka muusikadu wuxuu leeyahay kooxo badan oo koob ka ciyaarka oo ka qeybqaata waqtiyada riwaadyadaha iyo bandhigyada Gislaved ee kooxda durbaanka iyo kuwa kale oo iskoolka muusikada.

Waxaa baranaysaa sida loo isticmaalo usha durbaanka iyo waxyaabaha durbaanka looga baahan yahay. In aad is diwaan geliso laga bilaabo 7 sano jir. Waa bilaash lacag maaha.

## Qorida muusikada

Qofkii doonaya in uu hormariyo sida loo qoro loona akhriyo laxanka muusikada oo raba in uu wax badan ka ogaado codkiisa. Waxaad fursad u haysataa in aad heesto keligaa iyo dad kaleba.

Waxaa u baahan tahay in aad ka shaqayso farsamada iyo soo bandhiga shaqsi ahaan, daryeelka codka iyo raacida laxanka, adigoo dooran hal dhinac oo kugu haboon naftaada iyo horumarkaaga.

## Koox isla heesid

Ma dooneysaa in koox la heesto waxaa ka mid noqon kartaa iskoolka muusikada kooxda isla heesta sida, Codka dhalinyarada ( Young Voices). Waa bilaash.

– Fasalka iskoolka 3 – 4
– Fasalka iskoolka  5 iyo wixii ka sii sareeya

## Codsi ama Dalab

Waa soo codsan kartaa iskoolka muusikada laga bilaabo fasalka 2 ilaa iyo dugsi sare. Codsiga waxaa ugu danbeeya 26 bisha Maarso dadka la qaadan doono xagaaga ka dib, laakin codsigaaga waa soo diri kartaa sanadka oo dhan.

Waxaad ku soo codsan kartaa qaabka internetka ah adigoo raaci meesha tilmaanta ee xarunta websiteka u gaara ah oo aad ka helo karto warqada codsiga ee iskoolka muusikada: musikskolan.gislaved.se

Dadka loo qaadan waxay u dhacaysaa qaab bakhtiyaa nasiib ah. Dadka aan toos ugu soo bixin, waxaa lugu qoro saf suge waxaana si dhakhso ah luguu qaadan markii boos banaan la helo.

## Kharashka waqtiga barashada

Waqtigaan hadeer ah waa 700 kronor halkii termin oo 6 bilood ah.

Koox heesida iyo noocyada kala duwan waa bilaash.

Qiimo dhimista walaalaha: 100 kronor  caruurta wada dhashay midka labaad, 200 kronor midka sedexaad iyo wixii sii dheer walaalaha.

Waxaa horey loo sii bixin lacagta sedexdii kasta oo xiisada ah casharada ah lamana soo celin doono lacagta hadii ardeygu joojiyo ama uu iska xiro.

Waxaa lacag muusikada laxanka qoran , xargaha kitaarka iyo tuuboonka la socda.

Qalabka la kiraysan waa 200 kronor lixdii biloodba teermiinka.

Barashada turunbada loo yaqaan Suzuki waa 1000 kronor teermiinkii kasta.

HA ILAAWIN

Marna maaha in aad ka soo daahdey in aad bilowdo heesida iyo tumida qalabka muusikada !

KU SOO DHOWOOW CODSIGAAGA

Webbsida: musikskolan.gislaved.se E-post: musikskolan@gislaved.se Tel: 0371-812 93 Musikskolan Gislaved Södra Storgatan 34 332 33 Gislaved© 2019 Gislaveds kommun Bilder: Ingemar Schön, Lina Falk, Monika Suvajac